

## **Waa Maxay Sababta loola Shaqeeyo GURI-IIIBIYE®?**

Dadka intooda badan, iibsiga ama gadidda guriga waxay ku lug leedahay hantidooda ugu qaalsan. Waa macaamil ganacsi oo muhiim ah oo la xidhiidha arrimo muhiim ah oo ay ku jiraan dhaqaale iyo dareen weyni. Helidda wakiil habboon waa muhiim. Halkan waxa ka jira 5 siyaabo oo GURI-IIIBIYAYAALKU® ay ku kordhin karaan qiimaha marka ay kugu hogaaminayaan dhexmarka habka iyo maskax ku heynta danahaaga ugu fiican.

### **Waxbarashada iyo Khibradda**

Guri walba waa mid ka duwan kuwa kale oo macaamilka looga baahan yahay hantida maguurtada ah waa is-bedeshaa muddo kadib. GURI-IIIBIYAHU® waxa uu la jaan qaadaa wixii hadda ka jira xagga sharciyada, xeerarka, heshiisyada iyo hab-dhaqanka. Weydii su'aalo si aad u hesho dareen kalsooni leh xagga adeegyada, waxbarashada, waayo-aragnimada iyo isgaarsiinta ee qofka aad dooratay inuu noqdo ka kuu dooda ee geedi socodka. GURI-IIIBIYAHAGU® inta badan waxa uu ku siin karaa maclummaad qiimo badan leh oo ku saabsan xagga guriga oo laga yaabo in aanad si kale ku ogaateen.

### **Xaaladaha Suuqa**

GURI-IIIBIYAYAALKU® waxa ay u dhowyihii inay noqdaan khubaro maxaliya ah ee bulshooyinkooda iyagoo la wadaagi kara maclummaadka ugu saxsan oo ku saabsan isbeddellada hantida maguurtada ah ee hadda jira. GURI-IIIBIYAYUHU® waxa uu ka caawiyaa kana hagaa macaamiishu inay sameeyaan go'aanno wargal ah oo ku saabsan iibsiga iyo gadidda iyaga oo siinaaya xogta hadda jirta ee guryaha la midka ah ee degaanka. Maskaxda ku hay in qiyaasaha lagu helo habka onleyinka ahi ay inta badan yihiin kuwo aan ahayn sax sababtoo ah waxay isticmaalaan diiwaanka cashuurta guud iaydoon la tixgelin xaalado muhiim ah xagga xogta kala iibsiga sida xaaladda, goobta, inta qol-jiif, musqulaha, iwm.

### **Heshiisyada iyo Gorgortanka**

Heshiisyada maanta waxay leeyihii bogag tiro badan iyadoo qalad yar oo ka mid ahi uu noqon karo mid ku kaca qiime weyn. GURI-IIIBIYUHU® waxa uu kaa caawin kara inaad sameyso sahamin ku saabsan waraaqahan adag iyo soo bandhigidda waxyaabaha ku leh tixgelinta sida ugu wanaagsan ee suurto galka ah. Waxa kale oo loo tababaray qarsoodi ku heynta maclummaadkaaga sirta ah iyadoo laga ilaalinayo kuwa kugula jira tartama. GURI-IIIBIYAHAGU® ma ahan mid loo dirto xagga geeddi-socodka oo keliya. Waxay keeni karaan cod ujeeddo leh iyo inta badan xaalad dareen leh.

### **Dhisidda Xiriirada**

Arrin muhiim ah oo ku saabsan socodka guusha GURI-IIBIYAH® waa u gudbinta macaamiishii hore. Kuwaasi waxay inta badan soo diri doonaa cusbooneyn si aad u hesho xog iyo sii joogteynta xiriirka ka dib soo-afjaridda. Marka ay timaado su'aal ku saabsan hantida maguurtada ah, GURI-IIBIYAHAGU® diyaar ayuu noqon doonaa si uu kaaga caawiyo. Wax badan oo wada-xidhiidh ah oo ku saabsan GURI-IIBIYAYAALKA® kuna saabsan la xidhiidhka xirfadlayaal kale oo aad u baahan tahay si ay kaaga caawiyaan sidii aad u badbaadin lahayd maalgashigaaga iyo iyagoo ku siin kara liiska tixraacyada si lagaaga caawiyo inaad sameyso xulasho caqli ku fadhida xagga adeegyada kale ee la xiriira gurigaaga.

### **Racidda Hab-dhaqanka Anshaxa**

Marka aad la shaqeysa GURI-IIBIYE®, waxaad kaashanaysaaa mid xirfadle ah oo ku shaqeeya sida ay dhigayaan xeerar adag ee anshaxa. Dad badan oo waddanka jooga ayaa liisan u heysta gadidda hantida maguurtada ah, laakiin keliya kuwa ka tirsan Ururka Qaranka ee GURI-IIBIYAYAASHA® (NAR) ayaa isticmaali kara kelmadda GURI-IIBIYE®. Xeerarka Anshaxa ee GURI-IIBIYAH® ayaa waxa ay hubin doonaan in laguula dhaqmo si xirfad iyo anshax leh ee dhammaan arrimaha macamilka. Xubnaha NAR waxa ay heli karaan tiro balaadhan oo ah fursado waxbarasho iyagoo inta badan ku hawllan adeegga bulshada, arrimaha horumarinta dhaqaalahi iyo ururrada xaafadda.

**La Xidhiidh GURI-IIBIYE® si aad wax badan u barato maanta!**